


# In wax la wada akhriyo ayaa ah wax cajiiiba ah!

Markaad adiga iyo ilmahaagu buuga wada akhridaan oo aad ka wada hadashaan ayay isla markaas luqada ilmuu horumareysaa iyadoo aad isla markaasna wada raaxeysanaysaan oo aad wada baashaaleysaan. Halkan ayaad ka helaysaa todoba talo oo ku saabsan sida aad ilmahaaga wax ula akhriyi karto!



**Bokstart**

Bilawga buugga (Bokstart)  
waa dadaal ku wajahan  
waalidiinta iyo dadka waaweyn  
ee garab jooga carruurta  
yaryar (0-3 sano jir ah), iyadoo  
ay ujeedadu tahay dhiirigelinta  
horumarinta luqadda.  
[bokstart.se](http://bokstart.se)

1

## Akhri = ku raaxeyso

Iska bakhtii tv-ga, moobaylka iyo kambiyuuterka. Meel isku wada kuusa. Hadda waxay gaartay wakhtii wax akhriska!

2

## Buuga ka wada hadla

In laga wada hadlo ayaa muhiim ugu ah si wax akhriska laftiisa la mid ah. Markay carruurta iyo dadka waaweyn is dhex galaan ayay luqaddu kobocdaa.

3

## U ogolow in waxa uu ilmahau xiiseynaayo ay wax hagaan

Waxa fiican inaad u ogolow in waxa uu ilmahau xiiseynaayo ay wax akhriska hagaan. Miyaan sawir gaar ah oo uu ilmahu xiiseynaayo jiraa – joogsada oo ka hadal kaas.

4

## Adigu ereyadaada ku sheeg

Sawirka farta ku fiiq oo sheeg. Ka shidaal qaado waxa uu ilmahu xiiseynaayo iyo khibradaha. Isticmaal afkaaga hooyo. Markaas ayay dhammaan luqadaha ilmahu horumara-yaan.

5

## Su'aalo weydii

Ilmaha soo jiido iyadoo aad su'aalo weydiinayso, Waxa wanaagsan inaad weydiyo su'aalo aan haa iyo maya uun loogaga jawaabin. Markaas ayuu ilmuuhu erayo badan isticmaali karaa si uu uga jawaabo, iyadoo ay taasi luqada horumarineyso.

6

## U akhri si dareen leh oo ku raaxayso

Tus inay buugaagtluu fiican yihiin. Markaas ayuu ilmahaagu sidaas oo kale u arki doonaa. Waxa fiican inaad isticmaasho codadka iyo dhaqdhaqaqa si aad ugu muujiso waxa buuggu ku dhigan.

7

## Buugta wada doorta

Mararka qaar buugta wada doorta. Ilmaha ayaa buug dooran kara adigoo aad adiguna buug dooranayso. Waa wax xiiso badan in wa la doorto qof weyn iyo qof yarba.



**Bokstart**